

# ★ OGOW ★ -XAQUUQDA- AAD LEEDAHAY

## **Haddii Uu Bolisku Ku Istaajiyo Ama Ku Qabto**

- Xaq baad uleedahay in aadan hadlin. Haddii aad dooneyso in aadan hadlin, u sheeg mas'ulka kula hadlayo. (Gobolada qaarkood waxaa laga yaabaa in aad u baahan tahay in aad isu aqoonsoontu ama aad u sheegto boolisika qofka aad tahay, haddii lagugu tuhmo ama lagaaga shakhiyo in aad danbi gashay.)
- Is daji. Ha ordini. Ha murmin/ha doodin, ha na dagaalin, hana hor istaagin booliska. Gacmaahaaganu ku hay meel ey booliska ka arki karaan.
- Weydi haddii aad fasaxantahay in aad tagto ama dhaqaqdo. Haddii jawabtu tahay haa, si deggan oo aamusnaan ah ku dhaqaq amu ku soco/ku tag.
- Ma aha qasab in aad raali ka noqotid ama ogalaato in naftaada/jirkaaga ama alaabta aad sidato la baaro ama la fatisho.

## **Haddii Lagu Joojiyo Adigoo Garigaaga/Baabuurkaaga Wata**

- Jooji gariga meebl ammaan ah sida ugu dhakhsaha badan oo suurto galka ah. Damigaa, shid nuurka/nalka gudaha, fur daaqada qaardeed, gacmaahaaganu saar ama kuhay isteerinka/wheel-ka gaariga.
- Haddii lagaa codsado, tusa boolisika lesinkaa gaariga, diiwaangelinta (teesaraha) gaariga, iyo caddaynta caymisika gaariga.
- Haddii uu sarkaal-ka boolisika ama wakiilka socdaalka ama immigration-ka ku weydiyo in uu fatisho ama baadho gaarigaaga, waad diidi kartaa. Laakiinse haddii boolisika rumaysan hayah in uu gaariga ama baaburkaaga ey ka muuqdaan caddayn dambali ah, wey baari karaan ama fatishi karaan gaarigaaga iyaga oo aan kaaga baahneen ogolaasho.
- Darawalada ama qofka gaariga wada iyo qofka rakaabka ah ama gaariga kujira, labadu ba xaq bey leylehiin ineysan hadlin oo ey aamusnaadaan. Haddii aad tahay qof rakaab ah ama gaariga saaran, waxa kale oo aad weydiin kartaa sarkalka haddii aad fasaxantahay in aad iska tagto ama iska dhaqaqdo. Haddii ay jawaabtu haa tahay, ka tag meesha adigoo aamusan.

## **Haddii Lagu Weydiyo Wax Ku Saabsan Xaaladdaada Socdaalka Ah Ama Immigration-Ka Ah**

- Waa xaaq u leedahay inaad aamusnaato. Qasab kuma tihid in aad ka jawaabto su'aalahu ku saabsan meesha aad ku dhalatay, haddii aad tahay muuadhin Maraykan ah, ama sida aad ku soo gashay dalka. (Shuruuc ama shuruudho gaar ah bey leylehiin waxyalaahu ku saabsan xuduudaha caalamiga ah iyo garoomada diyaaradaha, iyo shakhsiyaaadka sita fiiyo non-immigrant ah, oo ay ka midyihiin dadka dalxiisayaasha ah iyo dadka musafiriinta ganacsiga ah.)
- Haddii aadhan ahayn muuadhin Maraykanka ah oo aad sidoto ama heysato waraaqo socdaal rasmii ah ama sax ah (waraaqo immigration oo sax ah), waa in aad tustaa wakiilkaa socdaalka (wakiilkaa immigration-ka) haddii uu kuweydiyo.
- Been ha kashhegin waxii ku saabsan xaaladaada dhalashada ama jinsiyada Maraykanka ah ama ha dhifin oo ha tusin waraaqo been ah.

## **Haddii Boolisku Ama Wakiilada Socdaalka (Wakiilada Immigration-Ka) Yimaadaan Gurigaada Ama Aqalkaaga Ama Meesha Aad Dagantahay**

- Qasab kugu ma aha in aad gurigaga ku soo dhaweyso ama soo galiso hadeysan wadan/sidaniin waraaq ama amar oo saxiixan oo ka socda qadi ama Judge-ka.
- Weydi in ey ku tusaan waraaqda ama amarka qaadiga/judge-ka ey sitaan. Saraakiisha boolisika na waxa ey kaliya baari ka raan ama fatishi karaan meelaha ama waxyabaahu ku qoran waraaqda ama amarka saxiixan. Waraaq ama amar saxiixan oo kusaabsan xiritaan qof ah, waxuu siiri karabooliska xaq ey ku soo galaan guriga qofka magacisu ku qoranyahay waraaqda ama amarka saxiixan haddii ay rumaysan yihiin ama aaminsoon yihiin in ut qofkaa gudaha kujiro. Amar ama waraaq ku saabsan tarxiil ka (qofla tarxiilayo) (Amar/waraaq ICE) ma siineyso xaq in ey saraakiishu (booliska) soo galaan guri iyagoo aan loo fasaxin ama loo ogalaan.
- Xitaa haddii saraakiisha boolisika ay heystaan, waraaq ama amar ka socda qadi, xaq baad u leedahay in aad aamusnaato oo aadan hadlin. Haddii aad damacd/o/rabto/dooneyso in aad hadasho, ka soo bar gurigaaga, albaabkaaga na xir.



## **OGOW XAQUUQDA AAD LEEDAHAY**

*Waxaa ku istaajiyey askar/saraakiil booliska ka mid ah, ama mas'uul ama wakiil socdaal ama immigration-ka ka socda, ama FBI.*

## **Haddii Uu Boolisku Ku Xiro Ama Ku Qabto**

- Ha la dagaalin.
- Waa xaaq u leedahay inaad hesho muxaami ama qareen khaas kugu ah, laakiinse dawladdu ku ma siineyso mid. Haddii aadhan haysoon muxaami ama qareen, weydiiso liiska muxaamiinta ama adeegyo sharciga ah oo bilaash ah ama qiimo-yar ama qiimo jaban.
- Waa xaaq u leedahay in aad la xiriirto safaraada ama qunsuliyada dowladaada ama weydiiso sarkaal amma mas'uulku in uu jisheego safaraadaada ama qunsuliyada wadankaaqaa in aad keran tahay ama lagu xiray.
- U sheeg sarkalka socdaalka ama sarkalka immigration-ka in aad rabto inaad aamusnaato amma hadlin. Ha kala hadlin xaaladdaada socdaalka amma xaaladaada ku saabsan immigration-ka qof aakan ka ahayn muxaamigaaga ama qareenkaga.
- Ha saxiixin waxba, sida ogalasho tabaruh aha ka timid xagaaga oo bixitaan ah ama ogalaasho saarida ku xusan amu ku saabsan, adigoo aanaan la hadlin muxaami amma qareen. Haddii aad saxiixd waraaqaha, waxaa laga yaabaa in aad beesho amma kaa lunto fursad aad isku daydo in aad Mareykanka ku siit joogto.
- Ogow lambarkaaga socdaalka ama immigration-ka ah ("##" lambarka) oo u dhiiib qoysoaga amma cidaada. Waxay ka caawin doontaa in ey ku helaan amma helaan meesha aad joogto.

## **Haddii Laguu Qaado Ama Lagu Geeyo Jeelka Xarunta Socdaalka Ama Immigration-Ka (Ama "ICE")**

- Waa xaaq u leedahay inaad hesho muxaami ama qareen khaas kugu ah, laakiinse dawladdu ku ma siineyso mid. Haddii aadhan haysoon muxaami ama qareen, weydiiso liiska muxaamiinta ama adeegyo sharciga ah oo bilaash ah ama qiimo-yar ama qiimo jaban.
- Waa xaaq u leedahay in aad la xiriirto safaraada ama qunsuliyada dowladaada ama weydiiso sarkaal amma mas'uulku in uu jisheego safaraadaada ama qunsuliyada wadankaaqaa in aad keran tahay ama lagu xiray.
- U sheeg sarkalka socdaalka ama sarkalka immigration-ka in aad rabto inaad aamusnaato amma hadlin. Ha kala hadlin xaaladdaada socdaalka amma xaaladaada ku saabsan immigration-ka qof aakan ka ahayn muxaamigaaga ama qareenkaga.
- Ha saxiixin waxba, sida ogalasho tabaruh aha ka timid xagaaga oo bixitaan ah ama ogalaasho saarida ku xusan amu ku saabsan, adigoo aanaan la hadlin muxaami amma qareen. Haddii aad saxiixd waraaqaha, waxaa laga yaabaa in aad beesho amma kaa lunto fursad aad isku daydo in aad Mareykanka ku siit joogto.
- Ogow lambarkaaga socdaalka ama immigration-ka ah ("##" lambarka) oo u dhiiib qoysoaga amma cidaada. Waxay ka caawin doontaa in ey ku helaan amma helaan meesha aad joogto.

## **Haddii Aad Dareento In Xuquuqdaada Lagu Xadgudbay**

- Qor wax walba oo aad xasusato, oo ay ku jiraan Bajka ama nambarka badaaqada saraakiisha iyo nambarka gaariga askarta ama boolisika, iyo qeybtu amma meesha ey saraakiisha ka socdaal, iyo wiixii faahfaahin kale oodhan. Qaado macluumaad ka la xiriirkha iyo telefoonada markhaatiyada kula jooga amma dad arkay arinta. Haddii uu dhaawac ku gaaray, islamarkiiba raadso daryeel caafimaad amma tag isbitaalka, sawirona ka qaad dhaawacaaga.
- Dhiiibo ama gudbi cabasho ama dacwo qoraal ah oo aad u gudbin qaybta hay'adda arrimaha gudaha ee booliiska ama guddiga cabashada dadka rayidka ah. Xaaladaha intooda badan, haddii aad rabto, waxaa u gudbinkartaa cabashadaada amma dacwadaada si qarsoodi ah.

*Macluumaadkan halka ku qoran looguma tala galin in ey tahay la-talin sharci ah. Gobolada qaarkood sharciyadooda wey kala duwnaan karaan. Xarumaha isbaarinta iyo meelaha ka soo galinta Maraykanka (oo ay ku jirta xarunta garoonka diyaaradaha) waxey leyhiin shuruuc gaar u ah. Waxaa la qoray disember 2016 (Updated December 2016.)*

*Wixii macluumaad dheeraad ah, waxaad waci kartaa ACLU kaaga maxaliga ah [www.ACLU.org/affiliates](http://www.ACLU.org/affiliates).*

